



# Sheegida Walaacyada Kireystaha ee La xiriirto Kirada iyo Joojinta ku meelgaarka ah ee Ka saarida Kirada aan La Bixin

Waaxda Guriyeynta iyo Hormarinta Magaalooinka Mareykanka HUD (U.S. Department of Housing and Urban Development HUD) waxay hormariyeen buug-yaraahan si ay u siiso ka qeybqaatayaasha Foojarka Dooqa Guriyeynta HCV (Housing Choice Voucher HCV), Guriyeynta Dadweynaha, iyo ka qeybqaatayaasha Dhaqan celinta Dhixaadka Qeybta 8 (Section 8 Moderate Rehabilitation Mod Rehab) warbixin muhiim ah iyo ilaha ku saabsan bixinta kirada inta lagu jiro xaalada degdega qaranka ee la xiriirto cudurka faafa ee fayraska corona.

## Maxay ku saabsantahay ka joojinta ka saarida?

Ka saarida la xiriirta kirada oo aan la bixin, iyo dalacaadyada/qidmooyinka la xiriira kirada oo aan la bixin, si ku meelgaar ah ayaa loo joojiyay. Tani waxay quseysaa dhammaan ka qeybqaatayaasha HUD-caawisay ka soo bilow Maars 27, 2020 illaa Luuliyo 24, 2020<sup>1</sup>. Inkastoo Maamulka Guriyeynta Bulshadaada (Public Housing Authority's PHA) iyo Ogolaanshooyinka Xeerarka Daganaanshaha Joogtada ah (Admissions and Continued Occupancy Policies ACOP) iyo/ama Qorshaha Maamulka (Administrative Plan) lama cusbooneysiin karo, fadlan ka taxadar in joojinta ka saarida la xiriirta kirada oo aan la bixin ay diyaarsantahay.

## Dhibaato ku qabida kiro sameynta?

- **Ka qeybqaatayaasha foojarka iyo guriyeynta bulshada:** Haddii aad weysay shaqadaada ama aad la kulantay qasaaro weyn oo daqliga ah, **codso dib u baarid ku meelgaar ah** adigoo kaashanayo maamulka guriyeynta sida ugu dhaqsiyaha badan oo suurtogalka ah. Kiradaada waa la saxi karaa si ay u muujiso isbadelka daqliga ama waxaad u qalmi kartaa ka dhaafida dhibaataada dhaqaalaha. Maamulka guriyeyntaada waxay sidoo kale wax ka ogaan karaan ilaha kale ee deegaanka.
- **Ka qeybqaatayaasha foojarka kaliya:** **La xiriir milkiilaha gurigaaga isla markas.** La xiriir xili hore si aad uga hadashid qorshooyinka lacag bixinta imaan karta ama guryaha. Sabab la xiriirto qasaaraha daqliga oo sababtay ka dhaafida ku meelgaarka, saxitaanka kiradaada way saameyn kartaa. La xaqiji PHA iyo milkiilaha gurigaaga haddii aad heleysid deyn loogu talagalay bishii la soo dhaafay.

## Maxaa kale ayaa ah inaad ogaatid?

- **Kirada weli waa la iska rabaa** inta lagu jiro muddada waqtigaan oo waxay isku aruurineysaa lacagaha aan la bixin.
- Milkiilaha gurigaaga iyo PHA ma bilaabi karaan tallaabo ka saarid cusub oo kirada aan la bixin waana inaadan helin ogeysiin ku saabsan ka guurid la xiriirta kirada oo aan la bixinin laga bilaabo Maars 27, 2020 – Luuliyo 24, 2020.
- Milkiilaha gurigaaga iyo PHA kuma dalaci karaan wax qidmooyin dambe, ama dalacaadyada saxda ah/qidmooyinka, caawintaadana looma joojin karo sabab la xiriirta kirada waqtigeeda dhaaftay ee Abriil, Maajo, Juun iyo Luuliyo 2020.
- Haddii aadan weli bixin kirada kadib markii joojinta ka saarida ay dhacdo: **Ka qeybqaatayaasha foojarka** waxay u baahanyihiin inay si toos ah ula xaajoodaan milkiilaha gurigaaga si loo go'aansado sharuudaha dib loogu bixinayo kirada aan la bixin. Haddii kale, milkiilaha gurigaaga wuxuu si sharci ah u bilaabi karaa ka saarid. **Ka qeybqaatayaasha guriyeynta bulshada** waxay u baahanyihiin inay la shaqeeyaan PHA si loo bixiyo kirada aan la bixin oo lacag isku duub ah ama la dajiyu heshiiska dib u bixinta. Haddii kale, caawintaada waa la joojin karaa iyo/ama PHA waxay si sharci ah u bilaabi karaan ka saarid.
- Ka saarida oo kirada aan la bixin oo loo gudbiyey maxkamada ka hor Maars 27, 2020 way sii socon kartaa haddii aysan ka hor imaaneyn sharciyada gobolka ama deegaanka.
- PHA ama milkiilaha gurigaaga weli way joojin karaan caawinta weyna kaa saari karaan sababo la xiriira xadgudubka daroogada, fal dambiyeed, ku xadgudubka heshiiska kirada, wax is daba marin, xadgudubyada yar ee lagu celceliyay, sabab kaloo wanaagsan, iwm.
- HUD ma soo dhaxgasho ama kama qeybqaadato dacwadaha ka saarida. Haddii aad dareentid in si qalad ah lagaaga saaray, la xiriir hay'adda gargaarka sharciga deegaankaaga ama hay'adaha adeega bulshada. Haddii aad tahay ka qeybqaate Foojar, waxaad sidoo kale la xiriir kartaa PHA-ga deegaankaaga.



<sup>1</sup>Lagu dajiyay Qeybta 4024 ee Gargaarka fayraska Corona, Caawinta, iyo Xeerka Amniga Dhaqaalaha (Economic Security Act), 2020 "Xeerka CARES" (Sharciga Bulshada 116-136).